



Suuxdinta maxalliga ah ee qalliinka indhahaaga

Warqadan waxaa ay sharxaysaa waxa laga filan karo markii indhahaaga qaliin lagu sameynaayo oo la adeegsanaayo suuxdinta maxalliga ah. Waxaana soo qoray dakhdaatiirta khibrad u leh suuxdinta maxalliga ah, bukaanada iyo wakiilada bukaanada, ayagoo wada shaqaynaayo.

Suuxdinta maxalliga ah ee qalliinka indhaha.

Suuxdinta maxalliga ah waa nooc kamid ah daawo taas oo kaa reebeysa inaad xanuun dareento. Qalliinka indhaha, waxaa loo siin karaa in isha lagu dhibciyo mise/iribado ahaan. Kadib markii lagu siiyo suuxdinta maxalliga ah, weli waad soo jeedaysaa oo waad ka warqabtaa waxa kugu dhacaya. Ujeedadu waa in aadan xanuun dareemin wakhtiga qalliinka isha..

Waa maxay faaidooyinka suuxdinta maxalliga ah?

Suuxdinta maxalliga ah badanaa waxaa ay si wacan ugu shaqeysaa kaa ilaalinta inaad dareento xanuun wakhtiga qalliinka isha. Waxaa sidoo kale:

- kaa qaboojisaa xanuunka qalliinka kadib, Sacado badan.
- Badanaa waxay leedahay haliso iyo saameyn yar marka la barbar dhigo suuxdinta guud, gaar ahaan hadii aad da' tahay
- Ay sahleysaa soo kabasho dhaqso ah qalliinka kadib, sidaa darteed waxaad guriga aadi kartaa isla maalintaas
- ay kuu ogolaanaysaa inaad daawooyinkaaga caadiga ahaa aad sii wadatid qaadashadooda
- Ay kuu ogolaanaysaa inaad si caadi ah wax iskaaga cunto aadna cabto marka la barbar dhigo suuxdinta guud, shaqaalaha jooga isbitaalka ayaa kaa waanin doon wax ku saabsan tan.

Waxaa aan doorbidi lahaa suuxdinta guud; ma u heystaa kala doorashada?

- Haa. Waxba kuguma dhacaayo ilaa aad ka fahantid oo aadna ka ogolaanayso waxa adiga lagu qorsheeyay.

- Haddii aad doorbideysid suuxdinta guud, waa in aad kala hadashaa dhakhtarkaaga suuxdinta ama qalliinka sida ugu dhakhsida badan oo ugu macquulsan. Waxaa jiri kara sabab caafimaad oo aan suuxinta guud loogu talin karin. Waxaad u baahan kartaa inaad in badan sugto qalliinkaaga, maadaama liisaska sugitaanka ee qalliinka suuxdinta guud ay sii dheeraan karaan. Isbitaalada qaarkood ayaa laga yaabaa inaysan awoodin inay ku bixiyaan qalliinno suuxin guud.

Sidee loo siiyaa suuxdinta gudaha?

Waxaa jiro labo nocyo oo suuxdinta maxalliga ah:

- qalliinada qaarkood waxaa lagu fulin karaa adeegsida dhibcaha isha taas oo isha kadhigi karta mid aan waxba dareemin. Cirbado looma baahna. Dhakhtarkaaga qalliinka ayaa awoodi doona inuu kuu sheego haddii tani ay suurtagal u tahay nooca qalliinkaaga
- Qalliinada badankooda waxaa ay u baahanyihiin suuxdinta maxalliga ah ee cirbadaha. Tan waxaa ka mid ah qalliinno ay tahay in isha lagu joojiyo hal meel si aad ah - tusaale ahaan qalliinnada qaybta dambe ee isha. Dhibco ayaa la siiyaa marka hore, si loo kabuubiyo isha dusheeda. Kadib irbad ayaa lagu duraa isha agteeda (laakiin laguma duro wareega isha gudaheeda).

Cirbadda suuxdinta miyay xanuun badantahy?

Tani qofba qof bay ku kala duwan tahay. dhibcaha isha ee kabuubisa dusha sare ee isha ayaa marka hore la adeegsadaa si ay uga dhigto mid raaxo leh intii suurtagal ah. Cirbad aad u dhuuban ayaa la isticmaalaa waxaana laga yaabaa inuu jiro karo dareemid wax qaniinyo ah ama cadaadis, oo badanaa qaata wax ka yar hal daqiiqo

Qof walba ma la siin karaa suuxdinta maxalliga ahe ee qalliinka indhaha?

Maya. Si aad si ammaan ah qalliinkaaga ugu adeegsato suuxdinta gudaha, waxaad u baahan doontaa inaad awood u yeelatid:

- jiifso si macquul ah oo deggan illaa 45-60 daqiiqo
- raac tilmaamaha fudud.

Daawada suuxinta caadi ahaan laguuguma talinayo haddii aad:

- xasaasiyad ku leedahay dawooyinka suuxinta ee deegaanka
- aan jiifsan karrin si macquul ah
- ay ku adag tahay ama aan macquul ahayn in lagu sii hayo dhaqdhaqaa la'aan, tusaale ahaan cudurka Parkinson
- ay kugu adkaato xasuusto waxa dhacaya, tusaale ahaan waallida dhexdhexaad ah
- qabtid qufac aadan xakamayn karin
- qabtid dhibaato xagga maqalka ah oo daran
- Ku adkaanaya fahamka waxa la sheegayo
- qabtid cufan daran.

Haddii mid ka mid ah kuwan ku khuseeyo, dhakhtarkaaga qalliinka ayaa kala hadli doona xulashooyinkaaga takhtarka suuxinta, laakiin suuxdinta guud ayaa la tixgelin doonaa.

Ayaa bixiya suuxdinta maxalliga ah?

Dhakhaatiirta suuxinta iyo dhakhaatiirta qalliinka indhaha labadaba waxaa loo tababaray inay maamulaan suuxinta maxalliga ah.

Ma jiraan wax dhibaatooyin ah oo ka imanaya suuxdinta maxalliga ah?

Suuxdinta maxalliga ah ee qalliinka indhaha ayaa ah ikhtiyaarka ugu badbaado badan dad badan. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad yeelato nabar ama isha madow, maadaama cirbadda ay dhaawacayso xidid dhiig oo yar oo isha ku wareegsan. Tani badanaa ma ahan mid halis ah laakiin waxay u ekaan kartaa wax arag xumaan ah toddobaad ama wax la mid ah. Aad bay u badan tahay haddii aad qaadato asbiriin ama dawooyin kale oo dhiigga khafiifiya.

Marar dhif ah, dhiig baxa yimaada ka dib cirbad qaadashada, waxa uu sababaa dhibaatooyin ku dhaca agagaarka indhaha. Dhakhtarkaaga qalliinka ayaa go'aamin kara in qalliinka dib loo dhigo maalin kale.

Dhibaatooyinka halista ah ee ka dhalan kara qalliinka

Halista dhaawac aad u weyn oo ishaadu u geysanayso araggaaga, xididdada dhiigga ama muruqyada indhaha, ayaa qiyaastii ah 1 ka mid ah 5,000 ama ka yar (sidaas darteed 1 ka mid ah 5,000 bukaan kasta oo la daweeeyey ayey saameeysaa). Marar dhif ah waxaa laga yaabaa inay saameyn daran ku yeeshaan wadnahaaga ama neefsashadaada. Dhakhtarka suuxinta iyo dhakhtarka qalliinka indhaha ayaa awoodi doona inay bixiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhibaatooyinka.

Qalliinka ka hor

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn kartid si aad isugu diyaariso qalliinkaaga iyo muddada soo kabashada haddii aad qalliin qorsheyneyso.

- Waxaa ugu fiican in hore loo sii qorsheeyo raysashadaada/bogsashada ee guriga ka dib, oo la ogeysiyo asxaabtaada iyo qoyskaaga sida ugu wanaagsan ee ay kuu caawin karaan. Ka fikir waxa aad cuni doontid iyo haddii aad u baahan tahay inaad is beddel ka sameyso gurigaaga si ay u soo kabashadaadu u fududaato.
- Haddii aad guriga ku soo noqoto isla maalintaas ka dib markaad suuxdinta guud ama suuxinta samayso, waxaad u baahan doontaa inaad abaabusho qof weyn oo mas'uul ah si uu guriga kuugu kaxeeyo baabuur ama tagsi oo kula joogo ilaa 24 saacadood. Macluumaadka loogu talagalay kuwa daryeelaya qof hadda uun maray suuxdin ama dajin "sedation" ayaa laga heli karaa buugyarahaenna *Daryeelka qof maray suuxdin guud ama dajin "sedation"*: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation
- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan diyaarinta qalliinka indhaha, fadlan eeg buugyarahaaga *Diyaarinta qalliinka indhaha* oo laga heli karo boggeena internetka: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/cataract

Rugta qiimeynta caafimaadka ka hor qalliinka

Marka taariikhda qalliinka la asteeyo, baaritaan caafimaad ayaa loo baahan yahay. Waxaa lagu soo diri karaa su'aalo kooban oo ku saabsan caafimaadkaaga ama waxaa lagu weydiin karaa inaad tagto rugta qiimeynta caafimaadka ka hor qalliinka. Kalkaaliyeyaasha caafimaadku waxay badanaa maamulaan rugta qiimeynta caafimaadka ka hor qalliinka, iyadoo dhakhtar la heli karo haddii loo baahdo talo.

Waxay ku weydiin doonaan su'aalo faahfaahsan oo ku saabsan caafimaadkaaga guud, daawooyinka, xasaasiyadda iyo heerarka dhaqdhaqaaqaaga. Haddii aad u baahato wax baaritaan ah, kuwaas waxaa laguugu diyaarin doonaa isla rugtan.

Waxay kaloo ku weydiin doonaan xaaladda gurigaaga si loo hubiyo inaad haysato taageero kugu filan qalliinka ka dib.

Waa muhiim in aad qorsheysid sida aad guriga ugu maareyn doonto xaaladdaada qalliinka ka dib iyo in qof kula joogi karo si uu kaaga warqabo iyo in uu kaa caawiyo qaadashada gojada indhaha.

Haddii araggaagu ku liito isha kale, tani si gaar ah ayay muhiim u tahay.

Waxa kale oo aad u baahnaan kartaa in aad iska fogeyso alaabta guriga si ay kuugu fududaato soo kabsashada qalliinka ka dib.

Daawooyinkaaga caadiga ah

Shaqaalaha jooga rugta qiimeynta caafimaadka ka hor qalliinka, ayaa diiwaan gelin doona daawooyinka aad qaadato. Fadlan soo qaado liiska daawooyinka aad qaadato ama dawooyinka laftooda iyo baakadahooda/caagadahooda.

Tani waa inay kujirtaa daawooyinka aad iskaa u soo iibsatid oo idil, ama daawo-dhireedka ee aad qaadato.

Daawooyinka badankood waxaa loo qaadan karaa sidii caadiga ahayd qalliinka ka hor.

Laakiin, daawooyinka ama kiniiniyada qaar waa in la joojiyaa maalin ama dhowr maalmood ka hor qalliinka.

Waxaa lagu siin doonaa tilmaamo ku saabsan waxa aad qaadanaysid iyo waxa aad joojineysid qaadashadooda.

Tilmaamahan waa muhiim waana in si taxaddar leh loo raaco.

Haddii aad qaadato daawooyin sida; 'clopidogrel', 'rivaroxaban', warfarin ama daawooyinka kale ee 'dhiig-khafiifiyeyaasha' waxaad u baahantahay tilmaamo gaar ah oo iyaga ku saabsan. Khatar ayaa ka iman karta joojinta daawooyinkan, waana in aad kala hadashaa dhakhtarkaaga. Waxaa laga yaabaa in aadan u baahnayn in aad daawooyinkan u joojiso qalliinka indha fiiqista.

Maalinta qalliinka

Waa in aad heshaa tilmaamo cad oo ku saabsan haddii joojinayso cunista iyo cabitaanka iyo goorta aad joojinayso.

Ilaa iyo inta lagaa joojinaayo, waa inaad qaadataa daawooyinkaaga caadiga ah. Waa in aad raacdaa tilmaan kasta oo lagu siiyo oo ku saabsan cunista iyo cabitaanka ka hor qalliinka. Waad cabi kartaa biyaha aad ku liqaysid kaniiniyada aad u baahantahay in aad qaadato.

Haddii aad leedahay qufac ama hargab daran maalinta qalliinka, waa inaad taleefan u dirtaa waarka si aad talo uga hesho.

Qalliinkaaga dib ayaa loo dhigi karaa haddii loo baahdo.

Fadlan soo qaado dhammaan daawooyinkaaga, kiniiniyada iyo qalabka neefsashada si dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaad ay u baaraan.

La kulanka dhakhtarkaaga qalliinka

Waxaa kuu imaanaya dhakhtarkaaga qalliinka indhaha (dhakhtarka indhaha).

Iyaga ayaa hubin doona isha qalliinka lagu sameynayo waxayna kaala hadlayaan qalliinka. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foomka ogolaanshaha waxayna saari doonaan calaamad isha qalliinka lagu sameynayo.

La kulanka dhakhtarka suuxinta

Haddii dhakhtarka suuxinta uu la shaqeynayo dhakhtarka qalliinka indhaha, waad la kulmi doontaa iyaga waxayna ka jawaabi karaan wixii su'aalo ah ee aad ka qabtid suuxdinta.

Waxa kale oo aad la kulmi kartaa howl-wadeennada qeybta Suuxdinta kuwaas oo ah xirfadlayaal daryeel caafimaad oo aad u tababaran. Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan kaalintooda iyo kooxda suuxinta boggeena:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team

Su'aalaha aad jeceshahay inaad weydiiso dhakhtarka suuxinta ama qalliinka

- Yaa suuxinta isiin doona?
- Miyaad in badan adeegsatay suuxdinta noocan ah?
- Miyay tahay in aan qaato suuxdinta ku kooban goobta la qalaayo?
- Waa maxay khataraha suuxdinta noocan ah?
- Wax khatar ah oo gaar ah miyay ii leedahay aniga?
- Sidee baan dareemi doonaa intaa kadib?

Ma heli karaa wax iga caawiya inaan isdejiyo?

Dhakhtarka suuxinta iyo shaqaalaha kale ee goobta qalliinka ayaa aad looga bartay inay siiyaan kalsooni iyo inay dadka ka caawiyaan inay isdejiyaan. Daawooyinka dajinta ayaa mararka qaarkood la siin karaa. Laakiin, waxay dhibaato u keeni karaan inta lagu jiro qalliinka haddii aad seexatid ka dibna aad si lama filaan ah u soo kacdid oo aad dhaqdhaqaaq samaysid, ama haddii neefsashadaadu yaraato. Fadlan haddii aad walaac ka qabtid qalliinka, kala hadal dhakhtarka suuxinta ama dhakhtarka qalliinka. Waxay kaaala hadlayaan fursadaha aad adigu heli karto.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan dajinta, fadlan eeg buug-yaraheenna lagu sharaxay dajinta 'Sedation' oo laga heli karo boggeena:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation

Maxaa xigi doona?

- Waxaa lagaa codsan karaa inaad gashato goonnada isbitaalka. Isbitaallada qaar waxay dadka u ogolaadaan inay xirnaadaan dharkooda. Waa inaad xirato dhar raaxo leh oo ka dabacsan qoorta.
- Qalliimada qaarkood, kalkaaliye caafimaad oo jooga qaybta ayaa ku siin doona waxoogaa goojo ah oo indhaha ah si ay u ballaarisoo bu'da ishaada (wey weyneyneysaa) Araggaagu waxyar buu mugdi galayaa in muddo ah.
- Waa fiicantahay in aad gashid musqusha (soo xaajo dhammaysatid) ka hor intaadan goobta qalliinka aadin si aad si raaxo leh ugu jiifsato.
- Kalkaaliye caafimaad ayaa kugu kaxeyn doona gaariga gacanta ilaa goobta qalliinka, kursiga curyaamiinta ama, haddii aad doorbideysid, waad lugeyn kartaa.

Shaqaalaha qaybta qalliinka ayaa ku weydiin doona xoogaa su'aalo ah si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga iyo qalliinka aad ku jirto. Iyagu mar labaad ayey kaa hubin doonaan isha qalliinka lagu sameynaayo waxayna eegi doonaan foomka oggolaanshahaaga.

Qolka suuxdinta

Waxaa laguugu seexin doonaa sariirta qalliinka lagugu sameynaayo. Barkin ayaa badanaa la geliyaa jilbahaaga hoostooda si culeyska looga khafiifiyo dhabarkaaga iyo miskaha

Dhakhtarka suuxinta ayaa laga yaabaa inuu kugu xiro qalab lagu kormeeraayo:

- **wadnahaaga:** istiikarada xabadkaaga ku dhagan (electrocardiogram ama ECG)
- **cadaadiska dhiiggaaga:** suunka cadaadiska dhiigga ayaa laga yaabaa in lagu xiro gacantaada. Tani waxay qiyaasi kartaa cadaadiska dhiiggaaga 5-tii ilaa 15-kii daqiiqo ee kasta inta lagu jiro qalliinka. Tani waxay ku dareensiin kartaa ciriiri oo dhanka gacantaada ah
- **heerka oksijiinta ee dhiigaaga:** kilib ayaa farta lagaa xiri doonaa oo loo yaqaanno (pulse oximeter).

Cirbad ayaa loo isticmaali karaa si laguugu xiro cannula (tuubo caag ah oo dhuuban) xididk gacantaada dusheeda ama garabkaaga. Tan waxaa lagu xeraayaa faashad dhejis ah. Tan waxaa loogu talagalay dhakhtarka suuxinta inuu kaa siiyo wixii daawo ah ee aad u baahan karto.

Kooxda suuxinta ayaa mar kale hubin doonta si loo xaqiijiyo magacaaga, taariikhda dhalashadaada iyo qalliinka lagugu sameynayo.

Dhakhtarka suuxinta ama dhakhtarka qalliinka indhaha ayaa markaa ku siin doona dhibcaha isha iyo / ama cirbado kaa kabuubyeynaya isha.

Qaadashada suuxdinta

Cirbadda suuxdinta miyay ku xanuunjineysaa?

Tani qofba qofka kale waa ay uga duwantahay. Waxaa jiri kara dareen qaniinyo, cadaadis ama xanuun, oo badanaa qaata wax ka yar hal daqiiqo.

Maxaa dhacaya ka dib suuxdinta goob gooni ah kadib?

Isha qalliinka lagu sameynayo waa la xirayaa si looga hortago wax kasta oo taabanaya ama waxyeelanayana isha dusheeda. Shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay ishaada gacan mariyaan, cadaadis saaraan ama culeys yar saaraan isha xiran si ay daawada suuxdinta ugu fiddo si siman.

Sideen ku ogaan karaa inay suuxdintu shaqeyneyso?

Dhakhtarka suuxinta ama dhakhtarka qalliinka indhaha ayaa fiirin doona ishaada si loo hubiyo inay kabuubyo tahay. Waxaa lagu weydiin karaa inaad fiiriso jihooyin kala duwan si loo qiimeyo saameynta daawada suuxdinta. Markii ay ku qancaan in daawada suuxdinta ay si fiican u shaqeyneyso, waxaa lagu geyn doonaa gudaha qolka qalliinka.

Maxaa ka dhacaaya qolka qalliinka?

- Qalabka lagu kormeero wadnaha iyo garaaca wadnaha ayaa la isugu xariirin doonaa.
- Kalkaalisada waxaa ay hubin doontaa in aad si raaxo leh u jifto.
- Kooxda qalliinka waxay sameyn doonaan baaritaan kale si loo xaqiijiyo warbixintaada iyo in qalabka dhammaantiisa uu sax yahay.
- Xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa kuu soo bandhigi kara inuu gacantaada qabto inta uu qalliinka socdo.
- Go' qalliin oo nadiif ah ayaa wajigaaga la saari doonaa sida daah oo kale si ay ishaada u ahaato mid nadiif ah. Go'a ayaa korka kuleh dalool si dhakhtarka qalliinka uu si fudud ugu shaqeyn karo ishaada.
- Tuubo ayaa la hoos gelin karaa marada qalliinka, taas oo kugu soo afuufi doonta hawo/oksijiin fareesh ah hareeraha afkaaga iyo sankaaaga. Tani waxay kaa caawineysaa inaad dareento raaxo inta lagu guda jiro qalliinka.

Aagga ishaada ku wareegsan waxaa lagu nadiifin doonaa dareere qabow. Inta lagu guda jiro qalliinka, biyo ayaa la isticmaali karaa si looga dhigo ishaada mid qoyan. In kasta oo taxaddar la sameeyay si looga hortago in biyahan ka soo daadanayaan dhinaca wejigaaga, mararka qaarkood way adagtahay in la iska ilaaliyo.

Ma hadli karaa inta lagu guda jiro qalliinka?

Waxaa fiican in aadan hadlin inta uu dhaqtarka qalliinka ka qalaayo ishaada, ilaa dhakhtarka qalliinka uu su'aal ku weydiyo mooye. Dhaqdhaqaaqinta wajigaaga waxay saameyn ku yeelan karta qalliinka. Haddii aad rabto inaad wax sheegto, waxaa fiican in aad gacantaada haadiso dhakhtarka qalliinka Indhahana qalliinka wuu joojinayaa si aad u hadasho.

Maxaan maqli doonaa?

Waxaad maqli doontaa dhakhtarka qalliinka oo lahadlaaya kooxda qolka qalliinka inta lagu guda jiro qalliinka. Qalabka qolka qalliinka waxay sameyn karaan dhawaaqyo kala duwan. Qalabka wadnaha ayaa laga yaabaa in uu 'shanqaro'. Mashiiinada qaarkood waxay leeyihiin cod dumar kuwaaso mar walba ku dhawaaqayo fariimo . Tani waa in loo sheego dhakhtarka qalliinka wixii ku saabsan isbadelada goobaha. Haddii dhakhtarka qalliinka uu doonayo in uu wax sameeyo, tusaale garkaaga xooga kor u yara qaad, waxa ay kuugu yeeri doonaan magaca. Haddii aan magacaaga lagu dhawaaqin, ma ahan in aad ka jawaabto.

Wax ma arki doonaa?

Badanaa waxad awoodi doontaa inaad aragto nalalka dhalaalaya waxaadna arki kartaa xoogaa dhaqdhaqaaq ah inta lagu jiro qalliinka. Tan way ku kala duwanyihiin qofba qofka kale. Ma awoodi doontid inaad aragtid wax faahfaahin ah oo waxyaabahana waxay kuugu muuqan karaan shucaac ahaan.

Maxaa kale oo dhici doona?

Dhakhtarka qalliinka wuxuu ku shaqeynaaya qalab wanaagsan oo gaaraayo ishaada gudaheeda – ishaada lagama bixinaayo booskeeda caadiga ah.

Miyaan xanuun dareemi doonaa inta lagu guda jiro qalliinka?

Waxaad ogaan doontaa in dhakhtarka qalliinka uu shaqeynaayo inta badanna aad dareemi doonaa xoogaa taabasho iyo cadaadis ah. Waa in aadan la kulmin wax xanuun ah inkasta . **Haddii aad dareento raaxo-darro ama xanuun, waa in aad u sheegtaa dhakhtarkaaga qalliinka si ay kuu siiyaan daawada suuxdinta gudaha haddii loo baahdo.**

Kawaran haddii aan iljabiyo?

Biinan yar yar ayaa isha ka ilaalinayo baalasha indhaha si ayagoo furan loo qalo. Taasi waxay ka dhigan tahay in aad wali ka iljabin karto ishaada kale. Ilaa inta aadan madaxaaga dhaqdhaqaaqin, way fiicantahay inaad il-bidhiqsato.

Kawaran hadaan rabo inaan iskala bixiyo, qufaco, cunaha nadiifiyo ama sanko xoqdo?

Waa in aad u seexataa si dhexdhexaad ah adna nuuxnuuxsanin adigoo isdajinaaya. Waxaad u baahantahay in aad uga digto dhakhtarka qalliinka adoo gacanta u haadinaayo ka hor dhaqdhaqaaq kasta oo weyn (oo ay ku jiraan qufac, xoqid ama iskalabixints si aad u hagaajiso booskaaga). Dhakhtarka qalliinka wuu joojinayaa qalliinka si aad si amaan ah ugu dhaqaaqi karto.

Ka waran haddii aan seexdo inta lagu guda jiro qalliinka?

Waxaa muhiim ah inaad soo jeedo inta lagu guda jiro qalliinka maxaa yeelay dhaqdhaqaaqa kediska ah ee aad sameeyso markii ad kasoo kacdo hurdada waxay halis galin kartaa inay dhaawacdo ishaada. Dhakhtarka qalliinka ayaa si joogto ah u

hubin doona in aad soo jeedo oo aad qanacsantahay. Sidoo kale way kuu digayaan haddii ay jiraan waqtiyo aad u baahan tahay in aad gaar ahaan daganaato.

Waxaan leeyahay kaadihays daciif ah. Kawaran haddii aan u baahdo inaan aado musqusha?

Waxaa lama huraan ah in aad soo faaruqiso kaadihaystaada waxyar uun kahor intaan lagu keenin qalliinka. Haddii ay dhacdo in aad dareentid rabitaan ah in aad musqusha aaddid oo aadan xajin karin, fadlan u sheeg kooxda qalliinka kuwaas oo qaadi kara talaabooyinka lagama maarmaanka u ah in ay ku caawiyaan.

Xanuun miyaan dareemayaa inta uu qalliinka socdo?

Haa. Mararka qaar, daawooyinka suuxdinta ayaa bilaabi kara inay baaba'aan. Haddii aad dareento dhibaato ama xanuun waqti kasta, waa in aad uogeysiisaa dhakhtarka qalliinka.

Intee in le'eg ayuu qalliinku soconayaa?

Badankood qaliimada waxa ay qaataan muddo u dhexeysa nus saac ilaa saacad. qaalimada qaarkood ayaa qaadan kara ilaa laba saacadood. Dhakhtarka qalliinka ayaa kuu sheegi doona qiyaas inta uu qaadan karo qalliinka.

Ma xiran karaa qalabka maqal-caawiya inta lagu guda jiro qalliinka?

waa dhaqan caadi ah in laga bixiyo qalabka maqal-caawiya dhanka isha la qalayo maxaa yeelay, xitaa iyadoo laga taxaddaraayo, biyo ayaa gali kara dhegta qalabka maqal-caawiyanna si xumaan ayuu u shaqeen kara wuxuuna bilaabi karaa inuu sameeyo sawaxan. Waxaad ku xernaan kartaa maqal-caawiya dhegta kale ee aan la qaleyn.

Qalliinka ka dib

Kalkaaliye caafimaad ayaa kursiga-naafada dib kuugu celin qeebta jiifka. waxaa laga yaaba in ishaada ay kabuubiyaysnaato labo ilaa seddex saacadood, inkastoo ay ka badan karto.

Ishaada waxaa laga yaabaa in ku daboolnaato faashad ilaa maalinta xigta, si loo ilaaliyo oo aadan xoqin xilliga aad hurdeysid. Marka faashadda laga fiiqo, waxay ishu noqon kartaa weershe ama in sheygii aad arkeyso laba shay kula noqdaan, muddo dhowr saacadood ah.

Goorma ayaan bilaabi karaa cunto cunid iyo cabitaan cabis?

Waa in aad u diyaar ahaataa inaad bilowdo cunidda iyo cabidda marka laguugu soo celiyo qeebta jiifka.

Goorma ayaan guriga aadi karaa?

Marka aad ladnaan dareemayso oo aad qaadatid cunto iyo cabitaan, waad aadi kartaa gurigaaga.

Haddii lagu suuxiyay, waa in uu qof weyn oo mas'uul ah gurigaaga kuugu geeya gaari ama taksi. Waa in muddo 24 saacadood ah aadan ilaalin caruur, waana in aad raacdaa talooyinka ku qoran buugyarahan hoose.

Macluumaadka loogu talagalay kuwa daryeelaya qof hadda uun maray suuxdin ama dajin "sedation" waxaa laga heli karaa buugyarahaenna *Daryeelka qof maray suuxdin guud ama dajin "sedation"*, kaasoo aad ka heli kartid degelkeenna:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation

Kalkaaliyaha caafimaad ee qeebta jiifka ayaa kuu sheegi doona wixii daawo ah ee aad u baahan tahay in aad qaadato, wuxuuna ku siin doonaa tilmaamo qoran. Goojada indhaha ayaa la isticmaali karaa kadib qalliinka, si loo yareeyo bararka, loogana hortago caabuqa. Waa lagu sheegi doonaa haddii aad u baahan tahay inaad ku soo noqoto rugta caafimaadka si dib laguugu baaro.

Xanuun miyaan dareemi doonaa?

Waxaa laga yaabaa in aad xanuun dareento marka ay daawada suuxdinta ka baxdo jirkaaga. Xanuun baabi'iyee sida barastamool ayaa loo baahan karaa .

Fadlan la xiriir lambarka ku qoran warqadaha haddii aad dareento xanuun daran maaddaamma ay tani caadi ahayn oo ayna tilmaameyso dhibaato.

Ma waxaan u baahanahay daryeel gaar ah?

- Iska ilaali in aad xoqdid ishaada.
- Ilaali indhahaaga (gaar ahaan xilliyada dabeylaha) haddii ay wax gaaraan ishaada.
- Ka fogow qaadista waxyaabaha culus, jimicsiga adag iyo dabaasha in muddo ah, sida ay kugula taliyeen kooxda ku daryeelaya.
- Haddii aragtidaada xummaato ama isha ay aad kuu xanuunto waa in aad si deg-deg ah ula la xiriirtaa isbitaalka
- Ka fogow xirashada miraayadaha indhaha illaa aad kala tashanayso dhakhtarkaaga.

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. Tayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg waxay kula tahay

Waxaan soo dhaweyneynaa talooyin ka si kor loogu qaado tayada buugyarahan.

Haddii aad haysid wax faalo ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta Suuxdinta.

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaaddii Shanaad, Febraayo 2020

Buugyarahan waxaa dib u eegis lagu sameyn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda daabacaadda.

© 2020 Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta Suuxdinta.

Buugyarahan waa la badin karaa ayadoo ujeedadu tahay kaliya in bukaannada loo soo saaro macluumaad anfacaaya. Fadlan dhowr xuquuqda oo xus halka aad ka soo xigatay. Haddii aad dooneysid in aad ku isticmaasho qayb ka mid ah buugyarahan daabacaad kale, waa in aad ku muujisaa qaybta horudhaca astaamaha, sumadaha iyo sawirrada aad ka reebtay.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir.